

FAAFINTA

RASMIGA

الرسمية



الجريدة

DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA
لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 16-aad. Garowe 24 July, 2014

Lam.7

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

TUSMADA

Qaybta Koowaad

Xeerka Xamuulka Gaadiidka Dawladda Puntland

Qaybta labaad

Xeer

Waxba ma leh

Qeybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

Waxba ma leh

***Sharci Lr 4. ee 24/07/2014, kuna saabsan Xeerka Xamuulka Gaadiidka
Dawladda Puntland***



PUNTLAND STATE OF SOMALIA

**Sharci Lr. 4 ee July 26, 2014, kuna saabsan Xeerka Xamuulka
Gaadiidka DPL**

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad
XGGW/DPL/88/2014 ee 20/07/2014.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

Qodobka 1-aad


Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka Xamuulka Gaadiidka
DPL

Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa
Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee
Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.


Qodobka 3-aad

Dhaqangalka Sharcigani wuxuu noqonayaa marka
Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee
Dawladda Puntland, baahina la geliyo.


Prof. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas
Madaxweynaha Dawladda Puntland



DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA



ولاية بونت لاند الصومال

GOLAHA WAKIILADA

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Ref:- XGGW/DPL/88 /2014 Garoowe, Sabti Date:-20/07/2014

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeedo:- Ansixinta Xeerka Xamuulka Gaadiidka DPL

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladdu:-

MARKUU ARKAY:-

Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad

MARKUU ARKAY:-

Soo gudbinta Madaxweynaha DPL. Ref
MW/DPS/477/2014 ee 7 July
2014 kuna saabsan Soo celinta Xeerka
Xamuulka Gaadiidka DPL.

MARKUU TIXGELIYEEY:-

Baahida loo qabo Ansixinta Xeerka
Xamuulka Gaadiidka DPL.

MARKUU DHEGAYSTAY:-

Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada ku
Ansixiyey **15/07/2014**. Xeerka
Xamuulka Gaadiidka DPL.


WUXUU GUDDOOMIYEEY:-

Ansixinta Xeerka Xamuulka Gaadiidka Dawladda Puntland.

GUUL EEBBE

Md. Siciid Xasan Shire

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.



1954



STATE OF KARNATAKA
GOVERNMENT

1954

STATE OF KARNATAKA

Director of Industries
Government of Karnataka

1954

1954

1954

1954

1954

1954

1954

1954

1954

1954

1954

1954

1954


1954

1954

1954

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA



ولاية بونت لاند الصومال

Xeerka Xamuulka Gaadiidka Ee Dawladda Puntland

Garowe, 20/July/2014

Xeerka Xamuulka Gaadiidka Ee dawladda Puntland

Tusmada xeerka

CUTUBKA 1AAD

- 1) Qodobka 1aad: Qeexitaan
- 2) Qodobka 2aad: Ujeedooyinka Xeerka
- 3) Qodobka 3aad: Dawrka wasaaradda Hawlaha Guud/Gaadiidka iyo Hay-adda PHA.
- 4) Qodobka 4aad: Guddiga ilaalinta xamuulka candhada (Axcel load) ee puntland.

CUTUBKA 2AAD: ilaalinta xamuulka candhada iyo balaca/dhererka gaadiidka

- 5) Qodobka 5aad: Mamnuucida xamuulka Saa'idka ah ee gaadiidka.
- 6) Qodobka 6aad: Masuuliyadda khidmadda ee xamuulka Saa'idka ah.
- 7) Qodobka 7aad: Ciqaab-maamuleedka ee xamuulka saa'idka ah.

CUTUBKA 3AAD: Maamulka Rarka gaadiidka

- 8) Qodobka 8aad: Miisaanka Gaadiidka.
- 9) Qodobka 9aad: Xaaladaha xamuulka xad-dhaafka ah, aan caadiga ahayn ama aan kala hari Karin.
- 10) Qodobka 10aad: Qaabka qaadidda xamuulka saa'idka ah.
- 11) Qodobka 11aad: Xareynta khidmadda iyo ganaaxa.

CUTUBKA 4AAD: Saraakiisha awoodda u leh (Baadhista)

- 12) Qodobka 12aad: waajibaadka Baaraha iyo Darawalka).
- 13) Qodobka 13aada: Wakiilasho Shaqo [out sourcing functions of PHA]].
- 14) Qodobka 14aad: Ganaax.

Cutubka 5aad: Qodobo Guud)

- 15) Qodobka 15aad: lifaaqyadayada la socda xeerkan waxay ka mid yihiin isla xeerkan xamuulka Gaadiidka.
- 16) Qodobka 16aad: Dhaqangal.

CUTUBKA 1AAD

Qodobka 1aad (QEEXITAAN)

- i. **Xamuulka xad-dhaafka ah:** Waxaa loola jeedaa xamuulka dhaafaya dherarka, balaca, joogga iyo culayska saa'idka ah ee gaadiidka lagu raray.
- ii. **Xamuul aan caadi ahayn:** Waxaa loola jeedaa xamuulka aan qaybsami Karin oo ka saa'id noqonaya mugga gaadiidka lagu rarayo.
- iii. **Xamuulka aan kala hari karin:** Waxaa loola jeedaa xamuulka aan la kala reebi karin marka lagu rarayo gaadiidka, kaasoo ka sara-maraya dhererka ama balaca Xeerku oggolyahay.
- iv. **Guddiga Sare:** Waxa loola jeedaa Guddiga Sare ee maamulka hay-adda waddooyinka puntland (Puntland Highway Authority BOD)
- v. **Agaasime Guud:** Waxa loo jeedaa Agaasimaha Guud ee Hay-adda Waddooyinka Puntland
- vi. **Xaddiga xamuul ee sharciga ah:** Waxa loola jeedaa dherer, balac/culays kasta kasoo uu qaadi karo gaadiid iyadoo tixgelin la siinayo candhada/candhooyinka gaadiidka qaadaya xamuulka.
- vii. **Kh) Wasiir:** waxa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda hawlaha Guud iyo gaadiidka
- viii. **Khidmadda xamuulka Saa'idka ah:** Waxaa loola jeedaa lacagta waajibta xamuul saa'idka ah dartiis oo uu bixiyo mas-uulka gaadiidka sida xamuulka Saa'idka ah.
- ix. **Miisaan:** waxa loola jeedaa agabka lagu cabbiro/miisaamo xamuulka uu sido gaadiidku.

Qodobka 2aad (Ujeedooyinka Xeerka)

Ujeedooyinka xeerkan waxaa ka mid ah

- 1) In laga hortago qaadidda xamuulka ka badan xaddiga xamuul ee xeerku oggol yahay iyo in la sameeyo maamul ilaaliya raridda xamuulka gaadiidka.
- 2) In lagu dhiirigeliyo dhammaan daneeyayaasha la socodka xamuulka sharciga ah, heerka dhererka/balaca xamuulka gadiidka iyo sugidda iyo kormeeridda talaabooyinka lagu ilaalinayo xamuulka saa'idka ah.
- 3) Ka hortegidda dhaawacyada waddooyinka loo geysto oo uu sababo xamuulka Saa'idka ah.
- 4) In la sameeyo nidaam lagu bixiyo khidmadda xamuul Saa'idka ah ee aan kala hari karin
- 5) In la asaaso xarumo tayeysan oo dawli ah oo lagu miisaamo xamuulka gaadiidka markii la wada dhiso jidka.

Qodobka 3aad

(Dawrka Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Hay'adda waddooyinka PHA)

1. **Wasaaradu** waxay xoojinaysaa wadashaqaynta ay la leedahay Hay'adda Waddooyinka puntland waxaana wasiirku ku leeyahay ilaalinta iyo kormeer sida howlaha hay-addu u socdaan sida uu qabo Qodobka 17aad ee Sharci Lr. 18 ee 14/12/2000.
2. **Agaasimaha Guud ee Hay'adda waddooyinka PHA** wuxuu hormarinayaa siyaasadda Hay'adda waddooyinka, wuxuuna kormeeraa habsami-u-socodka hawlaha iyo maamulka xamuulka candhada [axel laod] si uu u xaqiijiyo hiigsashada iyo gaaridda ujeedooyinka ku xusan qodobka 2aad ee isla xeerkan.

Qodobka 4aad

(Guddiga ilaalinta xamuulka candhada [axel load])

1. Waxaa la dhisayaa Guddiga ilaalinta xamuulka candhada [axel laod] ee Puntland, oo hoos tagaya Hay'adda waddooyinka puntland.
2. Guddiga ilaalinta xamuulka candhada ee puntland waxay ka kooban yihiin Gudoomiye, Xoghaye iyo Engineer oo ka imanaya shaqaalaha hay'adda waddooyinka (PHA), 2 (labo) xubnood oo ka imanaya daneeyeyaasha hay'adda waddooyinka. Guddiga ilaalinta xamuulka candhada waxaa magacaabaya Agaasimaha Guud ee Hay'adda waddooyinka waxaana ogolaanaya Guddiga Sare (BOD) ee isla Hay'adda PHA.
3. Shaqooyinka guddiga ilaalinta xamuulka candhada ee puntland waxaa ka mid ah:-
 - a. Qabashada iyo ilaalinta xamuulka candhada
 - b. Ka talo-siinta wasaarada Howlaha Guud iyo Gaddiidka iyo Hay'adda waddooyinka arimaha la xiriira xamuulka candhada, khidmadda iyo ganaaxa laga qaado gaadiidkaas.
 - c. U-gudbinta Bangiga Dawlada khidmadda laga soo xareeyo xamuulka saa'idka ah
4. Guddiga ilaalinta xamuulka candhada ee puntland waxay u soo jeedin karaan Agaasimaha Guud ee isla Hay'adda PHA in shaqada loo magacaabo kormeerayaal.
5. Agaasimaha Guud ee Hay'adda PHA isagoo la tashanaya Guddiga Sare ee Hay'adda waddooyinka puntland wuxuu u hawlgelaya sidii loogu heli lahaa dakhli kormeerayaasha la magacaabo ee ku xusan faqradda 4aad ee isla qodobkan.

Cutubka 2aad
(Ilaalinta xamuulka Candhada iyo dherarka gaadiidka)

Qodobka 5aad
(Mamnuucida Xamuulka Saa'idka ah)

Waxaa reeban in oggolaansho la`aan la wado gaadiid rarkiisu dhaafsiisan yahay inta xeerku jideeyay, ama xamuulka candhada (axel load) uu ka siyaaday xaddiga dherer/balac ee sharcigu qabo.

Qodobka 6aad

(Mas-uuliyadda khidmadda xamuulka Saa'idka ah, sida Kambaniyada waa weyn shirkadaha iwm Dherer/Balac, Joog iyo Culays)

- 1) Haddii gaari uu qaadayo xamuul ka badan xaddiga xamuul:-
 - a. **Balac** ee sharciga ah ee aan kala harin, mas-uulka gaadiidku waa inuu haystaa oggolaansho bixiyaana khimadda ku waajibtey xamuulka saa'idka ah dartiis oo dhan:- **\$.50 USD (konton cent ama qiimo shillin Soomaali u dhigma) halkii kiiloomitir (1KM)**
 - b. **Dherer jiif** ee sharciga ah oo aan wadada culays ahaan wax u dhimaynin, mas'uulka gaadiidku waa inuu haystaa oggolaansho bixiyaana khidmadda ku waajibtey xamuulka saa'idka ah dartiis oo dhan:- **\$ 0.30 USD (Sodon senti Dollar ama shilin soomaali u dhigma) halkii kiiloomitir 1KM.**
 - c. **Dherer Joog** ee sharciga ah oo aan wadada culays ahaan wax u dhimaynin, mas'uulka gaadiidku waa inuu haystaa oggolaansho bixiyaana khidmadda ku waajibtey xamuulka saa'idka ah dartiis oo dhan:- **\$ 0.15 USD (toban iyo shan senti oo Dollar ama shilin soomaali u dhigma) halkii kiiloomitir 1KM.**
 - d. Khidmada Culayska xad dhaafka ah waxay ku faah-faahsan tahay lifaaqa saddexaad ee Xeerkan
- 2) Haddii la ogaado in gaari uu wado xamuul ka badan xaddiga xamuul ee sharciga ah, gaarigana uu safar ku jiro, waxaa gaarigaasu muteysanaya bixinta khidmadii waajibka ahayd iyo ganaax.
- 3) Guddiga ama cidda uu u idmay xilkaas qabashadiisa ma ka noqonayaan mas'uul khasaare ama dhibaato soo gaarta mas-uulka gaadiidka dib-u-dhaca ku yimid safarkiisa.

Qodobka 7aad

(Maamul-cigaabeedka xamuulka Saa'idka ah)

- 1) Qofkasta oo ku xad-gudba rarka, saarana gaadiidka uu masuulka ka yahay xamuul saa'id ah wuxuu guddiga ilaalinta xamulka ku ciqaabayaa inuu bixiyo khidmadda xamuulka saa'idka ah iyo ganaaxa ku xusan lifaqa xeerkan
- 2) Ku noqnoqoshada falka ku xusan faqradda koowaad ee isla qodobkan waxay keeni kartaa in masuulka gaadiidka muteysto ciqaabaha soo socda midkood:
 - a) In laga mamnuuco isticmaalka waddo la cayimay ama dhammaan waddooyinka Puntland,
 - b) Inuu bixiyo qiimaha ugu sareeya ee khidmadda Xamuulka saa'idka ah
 - c) In la hor geeyo sharciga.

Cutubka 3aad

(Maamulka Rarka Gaadiidka)

Qodobka 8aad

(Miisaanka Gaadiidka)

- 1) Masuulka gaadiidka Xamuulka waa inuu goobjoog ahaadaa marka la miisaamayo gaadiidka,
- 2) U-hogaansanaan la'aanta waajibaadka ku xusan faqradda 1aad ee isla qodobkan waxay keeni kartaa ganaax lacageed oo aan ka badneyn \$50 (konton doolar).

Qodobka 9aad

(Qaadidda Xamuulka)

Qofna kuma qaadi karo gaadiid xamuul xad-dhaaf ah, aan caadi ahayn ama aan kala harin haddii:-

- a) Uusan bixin khidmadda ku waajibtay xamuulka laga hadlayo ee ku xusan isla qodobkan.
- b) Uusan haysan oggolaansho ka soo baxay guddiga awoodda u leh raridda xamuulka xad-dhaafka ah, aan caadiga ahayn ama aan kala harin.

Qodobka 10aad

(Qaabka qaadidda xamuulka saa'idka ah)

- 1) Agaasimaha Guud ee Hay'adda waddooyinka Puntland oo la tashanaya Guddiga sare ee isla hay-adda (PHA) wuxuu soo saari karaa qaabka loo qaadayo xamuulka xad dhaafka ah, aan caadiga ahayn ama aan kala harin.
- 2) Nidaamka ilaalinaya ama hagaya gaadiidka xamuulka kor ku xusan wuxuu noqon karaa sida soo socota:-
 - I. In ugu yaraan hal gaari oo yar ka horeeyo kana dambeeyo gaadiidka xamuulka sida iyadoo lagu xirayo nalka (leyrka) digniinta laguna qorayo labada baabuur oo yaryar: (Xamuul xad-dhaaf ah) "Abnormal load".
 - II. In la xaddido waqtiga safarka gaadiidka xamuulka sida.
 - III. In la sugo xaaladkasta oo uu guddigu u arko inay muhiim u tahay ammaanka qaadidda xamuulka, daryeelka waddada iyo deegaanka.

Qodobka 11aad

(Xareynta Khidmadda iyo ganaaxa)

- 1) Khidmadda xamuulka xad-dhaafka ah, aan caadiga ahayn iyo kan aan kala harin, iyo khidmadaha kale oo la ururinayo iyo ganaaxaba waxaa lagu shubayaa xisaabta Hay-adda Waddooyinka Puntland iyadoo ay ku leedahay Bangiga Dawladda iyadoo la dhowrayo habraaca iyo nidaam-xisaabeedka Dawladda Puntland.
- 2) Waaxda maamulka Lacagta ee Hay-adda PHA ayaa maamuleysa dakhliga Hay'adda, waxaana ansixinaya Agaasimaha Guud ee Hay'adda Waddooyinka Puntland.
- 3) Agaasimaha Guud ee Hay'adda Waddooyinka PHA wuxuu amri karaa in la baaro habsami-u-socodka iyo ku-dhaqanka sharciyeed ee xisaabaadka iyo dakhliga isla Hay'adda waddooyinka puntland (PHA) markasta oo ay la habboonaato.

Cutubka 4aad

(Xil gudasho)

Qodobka 12aad

(Waajibaadka Baaraha iyo Darawalka)

- 1) Baaraha gaadiidka iyo xamuulka waxaa magacaabaya Agaasimaha Guud ee Hay'adda Waddooyinka (PHA), waxaana waajibaadkiisa ka mid noqon kara:
 - a) Joojinta gaadiidka xamuulka si loo miisaamo loona baaro gaadiidka iyo xamuulka uu sidaba.
 - b) Hubinta dukumintiga gaadiidka iyo kuwa dadka mas-uulka ka ah isla gaadiidkaas.

- 2) Darawalka gaadiidka xamuulka wuxuu u hoggaansamayaa tilmaamaha uu siiyo baaruhu oo la xiriira dokumentigiisa, kuwa gaadiidka iyo kuwa xamuulka uu sido

Qodobka 13aad

(Wakiilasho shaqo [out sourcing functions of PHA])

Hay'adda Waddooyinka Puntland (PHA) waxay u wakiilan kartaa qeybo ka mid ah shaqadeeda (Maamulida Miisaanka Gaadiidka) Shirkado wadani ah, ama waxay u xil saari kartaa qayb ka mid ah shaqaalaha hay'ada Waddooyinka Puntland (PHA).

Cutubka 5aad (Ciqaab-maamuleed)

Qodobka 14aad

(Ganaax)

- 1) Wuxuu muteysanayaa ganaax qofkasta oo:
 - a) Bixin-waaya khidmadda xamuulka saa'idka ah ee xeerkani jideeyay iyo khidmaddii uu bixinwaayey oo laga qaado.
 - b) Dhaawac gaarsiiya waddada, xamuulka uu sido iyo taxadar la'aan darteed
 - c) Buuxinwaaya waajibkaadka looga baahan yahay xagga miisaanka xamuulka gaadiidka.
- 2) Ganaaxa ku xusan faqradda koowaad ee qodobkan kama yaraan karto \$ 50 (konton doolar) kamana badan karto \$ 150 (boqoliyokonton doolar) iyo dhaawicii waddada loo geystey oo la magdhabo.

Cutubka 6aad (Qodobo guud)

Qodobka 15aad

(Lifaaqayada Xeerkan)

Lifaaqayada la socda xeerkan waxay ka mid yihiin isla xeerkan.

Qodobka 16aad

(Dhaqangal)

Xeerkani wuxuu dhaqangelaya markii Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha DPL saxiixo laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah

Lifaaqyada Xeerkan ee ku saabsan Xamuulka Gaadiidka iyo khidmadaha

CULEYSKA SHARCI EE GAADIIDKA

Culayska gaariga ugu sareeya ee la ogol yahay

Candho Kooxeed (Axle Group) (with pneumatic Tyres)		Xamuulka Candho ee ugu sareeya (Kg) (maximum axle load)
A	Waraad	10,000 kg
B	Sideed Bool	15,000 kg
C	Candho Maydle/Labo cnadho (Axle)	24,000 kg
D	Gaariga iyo rimoor isjiidaya dhamaan 3 candho	28,000 kg

Lifaaqa 2aad Miisaanka ugu sareeya ee xamuul gaariga





	Gaariga iyo isku xirnaanta candhada [naqaska taayirada]	Culayska gaariga ugu sareeya
B	Gaariga leh 2 candho (Axle)	24,000
T	Gaariga leh 3 candho	26,000
J	Gaariga iyo rimoor isjiidaya dhamaan 3 candho	28,000
X	Gaariga leh 4 candho	28,000
Kh	Gaariga iyo rimoor isjiidaya dhamaan 4 candho	34,000
D	Gaari iyo rimoor jiidaya dhamaan 4 candho (Axle)	36,000
R	Gaari iyo rimoor uu jiidayo dhamaan 5 candho [axle]	42,000
S	Gaari iyo rimoor uu jiidayo [drawbar] dhamaan 5 candho [axle]	42,000
Sh	Gaari iyo rimoor uu jiidayo dhamaan 6 candho [axle]	48,000
Dh	Gaar iyo rimoor uu jiidayo [drawbar] dhamaan 6 candho [axle]	48,000







Lifaaqa 3aad Khidmada xamuulka xad dhaafka ah [overloading fee] Ganaaxa ugu yar xamuulka xad dhaafka ah

Darajada candho [axle] kasta ee xamuulka xad dhaafka ah ama culayska guud ee gaariga loo ogol yahay kilo garaam ahaan	Ganaaxa ugu yar [Doolar [US \$]]	
	Xukunka ganaaxa koowaad	Ganaaxa labaad ama xukumada soo noqnoqday
Wixii ka yar 1,000kg	US \$ 20	US \$ 40
1,000kg ama wixii ka badan oo ka yar 2,000kg	US \$ 40	US \$ 80
2,000kg ama wixii ka badan kana yar 3,000kg	US \$ 60	US \$ 120
3,000kg ama wixii ka badan kana yar 4,000kg	US \$ 80	US \$ 160
4,000kg ama wixii ka badan kana yar 5,000kg	US \$ 100	US \$ 200
5,000kg ama wixii ka badan kana yar 6,000kg	US \$ 120	US \$ 240
6,000kg ama wixii ka badan kana yar 7,000kg	US \$ 140	US \$ 280
7,000kg ama wixii ka badan kana yar 8,000kg	US \$ 160	US \$ 320
8,000kg ama wixii ka badan kana yar 9,000kg	US \$ 180	US \$ 360
9,000kg ama wixii ka badan kana yar 10,000kg	US \$ 200	US \$ 400
10,000 kg ama wixii ka badan	US \$ 220	US \$ 440

Lifaaqa 3aad (Shaxda gaadiidka iyo miisaanka loo ogolyahay)













Mass limits for Standard Vehicles Self Propelled Vehicles

Axle Configuration	Total Mass limit (tonnes)
 <p>6t 6t</p>	12.0
 <p>6t 9t</p>	15.0
 <p>6t 11t</p>	17.0
 <p>6t 13t</p>	19.0

Axle configuration	Total mass limit (tonnes)
 6t 16.5t	22.5
 6t 15t	21.0
 6t 20t	26.0
 10t or 11t 9t	19.0 or 20.0 *
 10t or 11t 16.5t	26.5 or 27.5 *
 10t or 11t 20t	30.0 or 31.0 *


*The higher axle load limit applies if the front steer axle group is load sharing.


Trailers

Axle Configuration trailers only	Load Limit (tonnes)	Pig trailers only (tonnes)
	6.0	6.0
	9.0	8.5
	11.0	10.0
	13.0	13.0
	16.5	15.0
	15.0	15.0
	15.0	15.0
	20.0	18.0
	20.0	NA
	18.0	NA
9t 9t		
	9t 16.5t	25.5
	16.5t 16.5	33.0
		NA

Note:

- The total mass of a combination other than a Road Train or B-double and any load must not exceed 42.5 tonnes. The loaded mass of a dog trailer or pig trailer must not exceed the loaded mass of the towing vehicle. Truck and dog trailer mass limits over 42.5 tonnes are available under Notice (General Class 3 Truck and Dog Trailer Combination Notice, 2001).


Prof. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas
Madaxweynaha Dawladda Puntland



Year	Population	Area
1950	100	100
1951	105	105
1952	110	110
1953	115	115
1954	120	120
1955	125	125
1956	130	130
1957	135	135
1958	140	140
1959	145	145
1960	150	150
1961	155	155
1962	160	160
1963	165	165
1964	170	170
1965	175	175
1966	180	180
1967	185	185
1968	190	190
1969	195	195
1970	200	200

Year	Population	Area
1950	100	100
1951	105	105
1952	110	110
1953	115	115
1954	120	120
1955	125	125
1956	130	130
1957	135	135
1958	140	140
1959	145	145
1960	150	150
1961	155	155
1962	160	160
1963	165	165
1964	170	170
1965	175	175
1966	180	180
1967	185	185
1968	190	190
1969	195	195
1970	200	200

The population of the area is shown in the following table. The area is divided into two parts, A and B. The population of part A is shown in the first column and the population of part B is shown in the second column. The total population of the area is shown in the third column.

The population of the area is shown in the following table. The area is divided into two parts, A and B. The population of part A is shown in the first column and the population of part B is shown in the second column. The total population of the area is shown in the third column.

1970